

Imtaxaanka Sanadka oo dhan ee Cusub ee Maine (Maine's New Through Year Assessment)

Sanad dugsiyeedka 2019-2020, xili ay bulshadeenu ka shaqaynayso kasoo kabashada aafada COVID-19, Waaxda Waxbarashada (DOE) ee Maine ayaa aqoonsatay baahida loo qabo in la siiyo qoysaska, ardayda, macalimiinta, iyo hogaamiyaasha waxbarashada xogta xiliga saxda ah oo muhiimka ah si ay u taageeraan waxbarashada ubadka. Si loo gaaro yoolkaan, Waaxda ayaa iskaashi la samaysay [NWEA](#), [sameeyaha imtaxaanka kobaca MAP](#).

Ayadoo macalimiin badan oo ku dhaqan Maine ay marhoreba adeegsanayaan imtaxaanaadka kobaca ee MAP ee NWEA si ay u cabiraan kobaca ardayda, waaxda DOE ee Maine ayaa kala shaqaysay NWEA abuurista imtaxaan cusub, oo hal-abuur leh oo gobalka oo dhan ah, Imtaxaanka Sanadka oo Dhan ee Maine ee Akhriska iyo Xisaabta. New Through Year Assessment ee Maine ayaa bixinaaya buundooyinka oo ah cabirka kobaca ardayga dhammaan sanadka iyo, dhammaadka sanadka, wuxuu bixinayaa buundooyinka hormarka oo lagu saleeyay heerarka gobalka.

Ardayda fasallada 3-8 iyo sanadka labaad ee dugsiga sare ayaa ka qaybgalaaya New Through Year Assessment ee Maine. Marka koobaad ee la baxsho New Through Year Assessment ayaa la samayn doonaa Maayo 2023, kadibna biloowga xiliga dayrta ee 2023 ardayda ayaa geli doona New Through Year Assessment ee Maine xiliga dayrta, jiilaalka (qasab maaha), iyo gu'ga. Ardayda ku hadla luuqadaha badan oo soo galay dugsiyada Maraykanka markay ahayd ama kadib Febraayo 4, 2022, imtaxaanka akhriska ee xiliga gu'ga ee 2023 qasab maaha.

Qaybaha Muhiimka ah ee New Through Year Assessment ee Maine

- Imtaxaanka ayaa **lagu sameeyaa kumbuyuutarka**. Kadib marka jawaabta saxda ah uu baxsho, ardayga ayaa arki kara su'aal ka adag tii hore. Kadib marka jawaab khalad ah uu baxsho, ardayga ayaa arki kara su'aal ka fudud tii hore. Sidaas awgeed, imtaxaanka ayaa la jaanqaadaya heerka ardayga waana mid gaar u ah arday kasta.
- Imtaxaanka ayaa loo sameeyay inuu ahaado **mid aan waqti ku xaddidnayn**. Ardayda waa in la siiyaa waqtiga ugu badan ee ay u baahan yihiin si ay uga jawaabaan su'aalaha imtaxaanka. Ardayga caadiga ah, imtaxaanka ayaa qaadanaaya ku dhawaad 60 daqiiqo maado kasta (Akhriska iyo Xisaabta).
- Imtaxaanka ayaa fursad u siinaaya macalimiinta inay qiimeeyaan ayna adeegsadaan **xog degdeg ah, oo ay talaabo ku qaadi karaan** si ay u qorsheeyaan casharka. Laga bilaabo xiliga dayrta ee 2023, macalimiinta ayaa heli doona xogta imtaxaanka 24 ilaa 48 saac gudahood.
- Imtaxaanaadka dayrta, jiilaalka, iyo gu'ga ayaa loo adeegsan karaa hal qaab oo **lagu qiimeeyo kobaca ardayga** intii muddo ah. Imtaxaanka xiliga xagaaga ayaa loo adeegsan karaa hal qaab oo **lagu qiimeeyo waxqabadka ardayga ee ku aadan heerarka gobalka ee loo asteeyay fasalka**. Si loo abuurto fahan dheeri ah oo buuxa oo ku aadan waxa ardaygaagu yaqaano uuna samayn karo, natiijooyinka kasoo baxa New Through Year Assessment ee Maine oo dhan ayaa lala adeegsan doonaa xogta kale ee dheeriga ah, sida imtaxaanaadka dugsiga iyo waxbarashada fasalka.
- Noocyo kaladuwan oo taageerooyinka ardayga ah **iyu farsamooyinka helitaanka taageerada** ayay heli karaan ardaydu si loo xaqiijiyo in khibrada imtaxaanku tahay mid waafaqsan casharada maalin kasta ee ardayda sida ugu badan. Qaybahaan helitaanka waxaa kamid ah, laakiin aan ku koobnayn, taageerooyinka iyo caawimaadaha ardayda leh qorsheyaasha taageerada, Qorsheyaasha Gaarka ah ee Barashada Luuqada, Qorsheyaasha 504, iyo IEP yada.

Mudada qaadista imtaxaanaadka gobalka, sida New Through Year Assessment ee Maine, ayaa isbadello kooban ku keeni kara jadwalka ama hawlaha joogtada ah ee ardayga. Qoysaska waxaa lagu boorinayaa inay la xiriiraan dugsigooda si ay u waydiiyaan su'aalo iyo walaacyada ay qabaan, ayagoo xaqiijinaaya in isfahan iyo wada shaqayn laga sameeyo abuurista khibrada imtaxaanka oo wanaagsan oo uu helo arday **kasta**.

Wixii xog dheeraad ah oo ku saabsan New Through Year Assessment ee Maine ee cusub, fadlan la xiriir macalinka ardaygaaga ama maamulaha dugsiga.